



## Xafiiska Qaramada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)

### **WARSAXAAFADEED 017/2010**

#### **Ergeyga Gaarka ah ee Xoghaya Guud ee Qaramada Midoobay oo si adag u cambaareeyay weerarkii is ismiidaaminta ahaa ee ka dhacay Muqdisho**

Nayroobi, 24 Agoosto 2010 – Ergeyga Gaarka ah ee Qaramada Danjire Augustine P. Mahiga ayaa si adag u cambaareeyay weerarka maanta lagu qaaday hoteel ku yaalla magaalada Muqdisho laguna dilay dad rayid ah iyo xildhibaanno ka tirsan Baarlamaanka.

“Falkan naxariis darrada ah oo waxashnimada ah, looguna dan lahaa in lagu daadiyo dhiigga ugu badan ee dad aan waxba galabsan, waa wax aan la fahmi karin”, ayuu yiri Danjire Mahiga. “Dadka ka dambeeyay dilkan waxay danaynayaan oo keliya inay burbur iyo dhibaato ku abuuraan dadka Soomaaliyeed.”.

“Hase yeeshi, kuma guuleysan doonaan ujeeddadooda qaska ku dhisan. Dadka Soomaaliyeed waxay ku taamayaan nabad wayna ku guuleysan doonaan. Geedisocodka nabaddu wuu ka sii socon doonaa Soomaaliya, inkastoo koox yari ay doonayso inay qasto geedisocodka.”

Danjire Mahiga wuxuu tacsiyo murugo leh u diray qoysaskii laga geeriyyoday iyo Dowladda Soomaaliya, wuxuuna kuwa dhaawacan u rajeeyay inay si dhakhso ah u bogsadaan.

“Weerarkan, oo gaar ahaan dhacay bisha barakaysan ee Ramadaan, wuxuu kordhinayaan keliya in dhammaan saaxiibada Soomaaliya ay sii labalaabaan taageerada ay u hayaan Ummadda Soomaaliyeed in si dhakhso ah loogu dhammeeyo colaadda ka jirta Soomaaliya oo dadka Soomaaliyeedna loo siiyo rajo mustaqbal wanaagsan ah.” ayuu yiri.

---

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xiriir: Susannah Price ama Donna Cusumano, saraakiisha qaabilسان isgaarsiintab guud, Xafiiska Qaramad Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya, Nairobi

Tel: +254 20 762 6805 / 6869 ama +254 733902020 ama 737400133

Fadlan eeg rugta Internet-ka (website):

[www.unpos.unmission.org](http://www.unpos.unmission.org)